

Xanuunka jidiinka (Ont i halsen)

Infekshada jidiinka ku dhaca badankood iyagaa iskood ugu bogsada toddobaad gudihii, xanuunkaas firus ama bakteeriya ha sababtee. Adiga iyo ilmahaaga ma idinku dhacay jidiin-xanuun iyo xummad aan lahayn qufac, xabeeb ama dhiif? Waxay markaa noqon kartaa cudurka cucumaha ama qumanka ku dhaca oo uu keeno infakshan uu sababay bakteeriyo, gaar ahaan nooca bakteeriyada ka mid ah oo loo yaqaan streptokocker.

Talooyin iyo macluumaad ku saabsan xanuunka jidiinka oo ay sababtay cudurka cumaha

In lagu daaweyyo antibiyootiko iyo in kale?

Haddii uu kugu dhaco xanuunka cumaha oo fudud dhaqso ugu ma bogsaneyso qaadashada anantibiyootikada. Haddiise dhuunta ama jidiinku aad kuu xanuunayo wuxuu dhakhtarku kugu sameynayaa baaritaan degdeg ah. Haddii baaritaankaasi muujiyo in ay dhuunta kaa gashay bakteeriyada streptokocker, waxaa lagugu la talinayaa in aad qaadato antibiyootiko. Haddii ay sidaas la garto, waxaa waqtiga xanuunka iska dhimaya 2 ilaa 3 maalmood. Kadib marka aad qaadato antibiyootikada 2 ilaa 3 maalmood ma qaadsiineyso cudurka dadka kale.

Qofka qaba bakteeriyada streptokocker lama daaweynayo

Waxaa caadi ah in carruurta ay dhuunta ka gasho bakteeriyada streptokocker iyagoo aan kala kulmin wax dhibaato ah. Ma jirto sabab ilmaha loogu sameeyo baaritaan degdeg ah mar haddii aysan ka muuqan in uu qabo cudurka cunaha. Waayadii hore waxaa dhici jirtey in cudurka cunuhu sababo xumad lafaha ah ama kelyaha oo barara. Laakiin maanta Sverige waa dhif iyo naadir in laga helo cilladahaas dheeraadka ah. Sidaas awgeed, ma habboona in antibiyootiko la siiyo dadka qaba stretokocker oo aan dhibaato ku qabin.

Talooyin wanaagsan

- Waxaa yareeya cabbitaanka iyo nacnac kulaylka.
- Waxaa la qaadan karaa kiniiniga xanuunka sida paracetamol ama ibuprofen).
- In la nasto marka xummad la qabo.
- In gacmaha badanaaba la dhaqo ama mayro si looga hortago in dadka kale la qaadsiyo.

In fiiro gaar ah loo yeesho

Dhakhtarka dib ula xiriir haddii aad ka sii darto ama aad ku ladnaan weydo 3 ilaa 4 maalmood gudahood. Waxed kaloo dhakhtarka la xiriireysaa haddii ay ku dhibeysa in aad afka kala qaaddo ama wax la laqdo. Waxed sabab u noqon kara in cunuhu ku bararo – qumamka oo malaxi ku samaysanto.

Daaweynta antibiyootikada marka loo baahdo oo qura

Waxaa muhiim ah in aan antibiyootikada isticmaalno oo qura marka ay waxtar dhab ah samayneyso. Waa in aan aamminnaa difaaca jirka iyo in aan jirka waqtii u siinno sidii uu bogsiin lahaa infakshanada caadiga ah. Xummaddu mar walba uma baahna in ay noqoto waxyeelo ee waxay qayb ka noqon kartaa difaaca jirka.

- Antibiyootikadu waxba kama tarto infakshanada firuska.
- Antibiyootikadu ma soo gaabiso waqtiga cudurka ka dhasha infakshanada fudud ee bakteeriyada.
- Antobiyyotikada waxaa weheliya waxyeeloo in ay ka mid yihii shuban iyo cuncun ama xajii.
- Iisticmaalka faraha badan ee antibiyootikadu wuxuu keenaa in bakteeriyadu noqoto mid adkaysi badan (resistenta).

Haddii aan yaraynno isticmaalka aan loo baahnayn ee antibiyootikada, waxaan ka hortegeynnaa in bakteeriyadu noqoto mid adkaysi badan. Markaas waxaan fursad u heleynnaa daaweynta infakshanada halista ah ee hadda iyo mustaqbal-kaba. Waxed dhammaanteed caafimaadkeenna ku kordhin karnaa annagoo cunna cunto wanaagsan, dhaqdhqaqaqa badina iyo gacmaha oo aan inta badan mayrna.

Xanuunka infakshanka dhegaha (Öroninflammation)

Infakshanka dhegaha ee carruurta (marmarna dadka waaweyn) caadi ayuu ugu dhacaa, mana aha infakshan khatar ah. Infakshanku inta badan isaga ayaa iska bogsooda iyadoo aan loo isticmaalin antibiyootiko. Waxaa muddo afar iyo labaan tan saac gudahood loo baahnaan karaa kiniiniga xanunjebiya, iyadoo aan loo eegin in antibiyootiko la qaato iyo in kale.

Talooyin iyo macluumaad ku saabsan infakshanka dhegaha

In lagu daaweyyo antibiyootiko iyo in kale?

Infakshanka dhegaha oo sahal ahi iskood ayey carruurtu uga bogsootaa iyadoo aan la siin antibiyootiko. Badanaana waa carruurta da'doodu u dhexeyso hal sannad ilaa labo iyo tobant sano. Laakiin haddii cunuggaagu jiro hal sano ama labo iyo tobant sano ka weyn yahay oo uu ku dhaco infakshanka dheguhu, waxaa la siinayaan antibiyootiko. Xataa infakshanka laba wejilaha ah ee dhegaha oo ku dhaca carruurta ka yar labo sano iyo infakshanka dhegaha oo dillaaciya durbaanka dhegaha waxaa lagu daaweyyaan antibiyootiko. Mararka qaarkood wuxuu dhakhtarku qoraa warqad mar dambe lagu qaato daawo, haddii ilmuu uu kaga soo ladnaan waayo maalin ama labo maalmood gudahood.

Dib ula soo xiriir

- Haddii dhegaha dibeddoodu bararto ama casaato amase dhegtu soo taagmato
- Haddii xanuunku ka soo daro oo ay weheliso xummad sare, kaar dheeraad ah ama xaaladda guud oo isbeddesha.
- Haddii dhegta dhacaan ka yimaado (amase u soo qaad warqaddii dhakhtarku qoray oo siii antibiyootiko).
- Haddii ay jiraan xaalado kale oo ka sii daray, sida xanuun, dhacaan soo daata ama wareer dheelliga ka dhumiya.

Talooyin wanaagsan

- Waxaa ilmaha la siinayaan daawada xanuunka dejisa, sida paracetamol. Waase haddii loo baahdo. Haddii ilmuu ka weyn yahay 6 bilood, waxaa kaloo la siin karaa ibuprofen.
- Madaxa ilmaha kor u tiiri adigoo hoosta ka dhigaaya barkimooyin dheeraad ah ama kor u qaadaya sariirta madaxeeda.
- Ilmaha waa in xanuunka iyo xummaddu ka joogsadeen maalin iyo habeen ka hor inta uusan tegin xannaanada carruurta ama dugsiga.

Sii dabagal

Ilmaha uu hal dheg kaga dhacay infakshanku uma baahna in la sii dabagalo xanuunkiisa. Carruurta ka yar afar sano, waa in lagu baaro xarunta caafimaadka haddii uu dhacay:

- Infakshan dhegaha oo labawejile ah.
- Kaga dhaco infakshan hal dheg, tan kalena uu dhacaan ka soo daato bannaanka durbaanka dhegta.

Waxaa caadiyan dhaca in maqalku isu dhimo si kumeelgaar ah marka infakshan ku dhaco dhegaha. Sidaas awgeed, waxaa muhiim ah in carruurta jirta afar sano iyo wixii ka weyn iyo dadka waaweyn oo xanuun kaga dhacay labada dhegood lagu sameeyo baaritaan bal maqalku weli liito saddex bilood kadib. La xiriir dhakhtarka mar walba oo Aad dareento ama ka shakisan tahay in ilmahaagu uusan si fican wax u maqlin. Taas oo aan ku xirnayn haddii infakshanka dheguhu ku dhacay iyo haddii kale.

Daaweynta antibiyooti-kada marka loo baahdo oo qura

Waxaa muhiim ah in aan antibiyootikada isticmaalno oo qura marka ay waxtar dhab ah samayneyso. Waa in aan aamminnaa difaaca jirka iyo in aan jirka waqtii u siinno sidii uu bogsiin lahaa infakshanada caadiga ah. Xummaddu mar walba uma baahna in ay noqoto waxyeelo ee waxay qayb ka noqon kartaa difaaca jirka.

- Antibiyootikadu waxba kama tarto infakshanada fiiruska.
- Antibiyootikadu ma soo gaabiso waqtiga cudurka ka dhasha infakshanada fudud ee bakteeriyyada.
- Antobiyyootikada waxaa weheliya waxyeelooyin ay ka mid yihii shuban iyo cuncun ama xajii.
- Iisticmaalka faraha badan ee antibiyootikadu wuxuu keenaa in bakteeriyyadu noqoto mid adkaysi badan (resistenta).

Haddii aan yaraynno isticmaalka aan loo baahnayn ee antibiyootikada, waxaan ka hortegeynnaa in bakteeriyyadu noqoto mid adkaysi badan. Markaas waxaan fursad u heleynnaa daaweynta infakshanada halista ah ee hadda iyo mustaqbal-kaba. Waxaan dhammaanteed caafimaadkeenna ku kordhin karnaa annagoo cunna cuntu wanaagsan, dhaqdhaqaqa badina iyo gacmaha oo aan inta badan mayrna.

Xanuun ku dhaca neefmareenka (Luftrörskatarr)

Marka infakshanka ku dhaco neefmareenka, waxaa barara ama cuncun yeesha mareenada neefta. Dhibaatada ugu darani waa qufaca oo socda ilaa saddex toddobaad. Waxaad adiga ama cunuggaagu isku arki kartaa xummadd, dhuun-xanuun iyo diif. Infakshanka mareenada neefta waxaa sababa fiirus. Badanaana isagaa infakshankaasi iskii isaga baaba'a.

Talooyin iyo macluumaad ku saabsan infakshanka mareenada neefta

In lagu daaweyyo antibiyootiko iyo in kale?

Infakshanka ku dhaca mareenada neefta looma baahna in lagu daaweyyo antibiyootiko, haddii qofku uu sidiisa kale uga caafimaadqabo sambabada. Xataa haddii infakshanka neef-mareenada uu keenay bakteeriyo, antibiyootikadu dhaqso kuuma caafimaadineyso. Dadka la og yahay in ay cudur ka qabaan sambabada waxaa mararka qaarkood la siyyaa antibiyootiko looga daaweyyo infakshanka neef-mareenada.

Qufacu waa difaac

Qufaca uu keeno infakshanka neef-mareenadu waa mid dhib badan, laakiin wuxuu qayb ka yahay difaaca jirka. Xaakada neef-mareenadu waxay difaacdaa jirka iyadoo soo ururineysa habaaska, bakteeriyada iyo fiiruska aan gudaha u neefsanno. Marka aan qufacno waxaan dibedda u soo tufnaa xaakadaas. Sidaas ayaan jirka uga saarnaa waxyalo uusan u baahnayn. Haddii kale waxaa dhici lahayd in ay ku kaydsamaan sambabada oo ay sabaan infakshano hor leh. In qufacu raago waxaa ugu wacan in cuncunka neef-mareenadu uu tartiib u soo bogsanayo.

Talooyin wanaagsan

- Cabbitaanku wuxuu badanaaba qaboojiyaa jidiinka, yareeyaana qufaca. Laakiin saamyn ta daawada qufacu ay ku leedahay qufaca aad ayey u yar tahay.
- Daawada xanuunka iyo xummaddu (sida paratemol ama ibuprofen) waxay dejyaan xummadda, dhuun-xanuunka iyo laabta oo xanuunta.
- Haddii ilmuuu uu aad u qufacayo habeenkii, waxaa yaraata hurdadiisa. Haddaba la joog ilmaha guriga si uu u nasto.
- Sigaar-cabbiddu waa ay uga sii dartaa oo wuxuu kordhiyaa khatarta in xanuunku soo noqnoqdo.
- Ku qufac oo ku hindhis laabka gacanta ama waraaqda diifka, gacmahana inta badan dhaq ama mayr si looga hortago in dadka kale la qaadsiyo.

In fiiro gaar ah loo yeesho

Badanaa waxay qaadataa 2 ilaa 3 toddobaad inta aad gebi ahaanba ka caafimaadeyso. Haddii aad caafimaad qabto qufaca ka sokow, markaas uma baahnid in aad welwesho. Haddiise aad bilowdo in aad dhiig qufacdo ama aad dareento in neeftu kugu dhegeyso, la xiriir rugta daryeelka caafimaadka aad ka tirsan tahay. Haddii qufacu kaa joogsan waayo 4 ilaa 5 toddobaad kadib, ama uu qufac waqtii dheer kugu soo noqnoqdo sannadkii marar badan, la xiriir rugta daryeelka caafimaadka.

Daaweynta antibiyooti-kada marka loo baahdo oo qura

Waxaa muhiim ah in aan antibiyootikada isticmaalno oo qura marka ay waxtar dhab ah samayneyso. Waa in aan aamminnaa difaaca jirka iyo in aan jirka waqtii u siinno sidii uu bogsiin lahaa infakshanada caadiga ah. Xummaddu mar walba uma baahna in ay noqoto waxyeelo ee waxay qayb ka noqon kartaa difaaca jirka.

- Antibiyootikadu waxba kama tarto infakshanada fiiruska.
- Antibiyootikadu ma soo gaabiso waqtiga cudurka ka dhasha infakshanada fudud ee bakteeriyada.
- Antobiyyootikada waxaa weheliya waxyeeloo in ay ka mid yihii shuban iyo cuncun ama xajiiin.
- Iisticmaalka faraha badan ee antibiyootikadu wuxuu keenaa in bakteeriyadu noqoto mid adkaysi badan (resistenta).

Haddii aan yaraynno isticmaalka aan loo baahnayn ee antibiyootikada, waxaan ka hortegeynnaa in bakteeriyadu noqoto mid adkaysi badan. Markaas waxaan fursad u heleynnaa daaweynta infakshanada halista ah ee hadda iyo mustaqbal-kaba. Waxaan dhammaanteed caafimaadkeenna ku kordin karnaa annagoo cunna cunto wanaagsan, dhaqdhaqaqa badina iyo gacmaha oo aan inta badan mayrna.

Sanqada oo xanuunta (Ont i bihålorna)

Marka qofka hargab ku dhaco, waxaa barara xuubabka sanka iyo sanqada. Waxaadna adiga ama carruurta heshaan xaako iyo sanqada oo idin xanuuna. Carruurta ugu yaryar wuxuu hargabku ku dhacaa 8 ilaa 12 goor sannadkii. Dadka waaweynna wuxuu ku dhacaa hargabku 2 ilaa 3 goor sannadkii ama ka badan haddii ay la nool yihiin carruur. Antibiyootikadu waxba kama tarto hargabka ama durayga.

Infakshanka sanqada waxaa badanaaba sababa firus ama bakteeriyo, laakiin waxaa kaloo sababi kara waxyaalo kale oo ka mid yihiin xasaasiyadda (allerjiga). Infakshanada badankood iyagaa iskood isaga bogsooda.

Talooyin iyo macluumaad ku saabsan xanuunka sanqada

Carruurta

Infakshanada carruurta ku dhaca waxay qayb muhiim ah ka yihiin dhismaha difaaca jirka. Sidaas awgeed ayuu hargabku badanaaba ugu dhacaa carruurta oo ay u yeeshaan diif midab leh, taas oo ay haya waqtii dheer. Daawada antibiyootikadu waxba kama tarto xanuunka noocaan ah. Carruurta diifku ka soo daato waqtii dheer waxaa sabab u noqon kara iyadoo waxyaalo dibedda ka yimid sida kuul ama wax kale ay isku gudbaan sanka.

Dadka waaweyn

Antibiyootikadu badanaaba waxba kama tarto infakshanka sanqada aan sidaas u darnayn. Dadka waaweyn oo uu toban maalmood ka badan hayo hargab uu weheliyo diif midab leh, dhafoor xanuun iyo ilko xanuun, waxaa wax tari kara antibiyootiko. Taasi waxay khuseysaa haddii dhakhtarku uu baaritaan sanka uga dhex helo diif xujmad weyn iyo haddii dhibaatadu tahay mid hal weji leh.

Infakshanka daran ee sanqada oo lagu ogaado raajada ama qalabka lagu eego jirka gudihiisa, waxaa waqtiga bogsashada laga dhimi karaa 4 ilaa 5 maalmood. Dhibaatada xanuunku waxay badanaa socota waqtii dheer, 2 ilaa 3 toddobaad, haddii antibiyootiko laga daaweyyo ama haddii kale.

Talooyin wanaagsan

- Sanka oo lagu nadiifiyo biyo diirran ama biyo cusbo leh waxay yareysaa xanuunka.
- Haddii sanku aad u xiran yahay waxaa lagu isticmaali karaa daawada sanka lagu buufiyo oo bararka dejisa, waase in la isticmaalo ugu badnaan toban maalmood.
- Daawada xanuunka dejisa haddii loo baahdo, sida paracetamol ama ibuprofen.
- Daawada sanka lagu buufiyo oo kortison ku jiro waxay wax u tari kartaa dadka waaweyn, gaar ahaan marka allerjiga la qabo ama sanku xasaasi noqdo.
- Barkimooyin dheeraad ah oo madaxa la hoosgeliyo marka la jiiro.

In fiiro gaar ah loo yeesho

Carruurta: Doono gargaar caafimaad degdeg ah haddii la qabo xummadi sareysa, daal iyo barar iyo casaan lagu arko sanqada ama indhaha dushooda.

Dadka waaweyn: Xanuun waqtii dheer (3–4 toddobaad ama ka badan), xanuun xooggan, wejiga oo barara ama xummadi sareysa waxay astaan u yihiin in aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdeg ah.

Daaweynta antibiyootikadu marka loo baahdo oo qura

Waxaa muhiim ah in aan antibiyootikadu isticmaalno oo qura marka ay waxtar dhab ah samayneyso. Waa in aan aamminnaa difaaca jirka iyo in aan jirka waqtii u siinno sidii uu bogsiin lahaa infakshanada caadiga ah. Xummaddu mar walba uma baahna in ay noqoto waxyeelo ee waxay qayb ka noqon kartaa difaaca jirka.

- Antibiyootikadu waxba kama tarto infakshanada firuska.
- Antibiyootikadu ma soo gaabiso waqtiga cudurka ka dhasha infakshanada fudud ee bakteeriyyada.
- Antobiyyotikada waxaa weheliya waxyeelooyin ay ka mid yihiin shuban iyo cuncun ama xajiiin.
- Iisticmaalka faraha badan ee antibiyootikadu wuxuu keenaa in bakteeriyyadu noqoto mid adkaysi badan (resistenta).

Haddii aan yaraynno isticmaalka aan loo baahnayn ee antibiyootikadu, waxaan ka hortegeynnaa in bakteeriyyadu noqoto mid adkaysi badan. Markaas waxaan fursad u heleynnaa daaweynta infakshanada halista ah ee hadda iyo mustaqbal-kaba. Waxaan dhammaanteed caafimaadkeenna ku kordhin karnaa annagoo cunna cuntu wanaagsan, dhaqdhaqaqa badina iyo gacmaha oo aan inta badan mayrna.

Svinkoppor ama Impetigo (Svinkoppor)

Svinkoppor waxa weeye infakshan la is qaadsiyo oo badanaaba ku dhaca maqaarka carruurta gaartay da'da dugsiyada barbaarinta. Nooca svinkoppor oo ugu caansan wuxuu maqaarka ka soo saara finan wata malax huruud ah. Wawaana sababa bakteeriyada loo yaqaan stafylokocker iyo streptokocker.

Svinkoppor ama impetigo wuxuu badanaaba ka muuqda wejiga, laakiin waxaa laga heli karaa jirka oo dhan. Bakteeriyadu waxay si fudud ugu dhet-taa maqaarka qoyan oo bararsan. Sababtaas ayuu svinkoppor ugu dhacaa carruurta qabta cambaarta. Haddaba si maqaarka carruurtaasi u noqdo mid jilicsan oo fayow, waxaa muhiim ah in lagu dhaasho ama subko kareem maqaarka jilciya iyo kiriim kortison leh.

Talooyin iyo macluumaad ku saabsan svinkoppor ama impetigo

Daryeelka inbeddelada yaryar ee maqaarka

Isbeddelada yaryar ee maqaarku iskood ayey u bogsadaan iyadoo la adeegs-anayo saabuun iyo biyo. Finanka qoy oo si fiican u mayr subaxdii iyo ha-beenkii ilaa inta ay finanku ka baaba'ayaan. Waxaa kaloo wax ka tari karaa haddii lala isticmaalo kiimikada klorhexidin (klorhexidinlösning) oo bak-teeriyada ka hortaga. Daawada klorhexidin waxaa warqad dhakhtar la'aan lagu iibiyaa farmashiyaha, waxaana la isticmaali karaa hal toddobaad.

Antibiyootikada loo isticmaalo isbeddelada maqaarka ee waaweyn ama nabarrada bogsan waayey

Haddii ay nabarradu bogsan waayaan toddobaa, ka kadib ama ay sii fidaan, waa inaad la xiriirtaa rugta daryeelka caafimaadka. Waayo waxaa loo baahnaan karaa kareemka antibiyootiko ah oo la mariyo maalintii sad-dex goor muddo shan maalmood ah.

Haddii isbeddel baahsan ku dhacay maqaarka cunuggaaga ama cudurka svinkoppor ka sii daray, waxaa loo baahan karaa antibiyootiko dareere ama kiniini ah.

Ka hortag in dadka kale la qaadsiyo

Waxaa svinkoppor lagu kala qaadaa jirka dadka oo istaabta ama uu jirka taabto alaab uu afka geliyey ilmo qaba svinkoppor.

- Carruurta iyo waalidkuba waa in badanaaba mayraan gacmaha. Waxaa lagu talinayaa in la isticmaal sabuun dareere ah iyo tirtirayaasha hal mar la isticmaalo ama shukumaan qofku iska leeyahay. Iisticmaal alkolada gacmaha lagu mayro.
- Ha la iska ilaaliyo in nabarrada la taataabto.
- Haddii ay suurtgal tahay ha lagu duubo faashad daldalool leh.
- Carruurta ha laga jaro ciddiyaha.
- Badanaaba beddel dharka iyo harqadaha.
- Ha laga carruurta qoriga cadayga iyo rabadhka (napp) ilmuu nuugaan.
- Ha la mayro alaabta carruurtu ku cayaarto oo ha la nadiifyo gacanqab-siga ilmuu taabtay.

Carruurta dhigata dugsiyada barbaarinta waa in ay guriga joogaan ilaa inta nabarradu gebi ahaanba ka qallalayaan. Carruurta waaweyn oo fahansan muhiimadda in gacmaha la mayro waa tegi karaan dugsiga.

Daaweynta antibiyooti-kada marka loo baahdo oo qura

Waxaa muhiim ah in aan antibiyootikada isticmaalno oo qura marka ay waxtar dhab ah samayneyso. Waa in aan aammin-naa difaaca jirka iyo in aan jirka waqtii u siinno sidii uu bogsiin lahaa infakshanada caadiga ah. Xummaddu mar walba uma baahna in ay noqoto waxyeelo ee waxay qayb ka noqon kartaa difaaca jirka.

- Antibiyootikadu waxba kama tarto infakshanada firuska.
- Antibiyootikadu ma soo gaabiso waqtiga cudurka ka dhasha infakshanada fudud ee bakteeriyada.
- Antobiyyootikadu waxaa weheliya waxyeeloo in ay ka mid yihii shuban iyo cuncun ama xajiiin.
- Iisticmaalka faraha badan ee antibiyootikadu wuxuu keenaa in bakteeriyadu noqoto mid adkaysi badan (resistenta).

Haddii aan yaraynno isticmaalka aan loo baahnayn ee antibiyootikada, waxaan ka hortegeyn-naa in bakteeriyadu noqoto mid adkaysi badan. Markaas waxaan fursad u heleynnaa daaweynta infakshanada halista ah ee hadda iyo mustaqbal-kaba. Waaan dhammaanteed caafimaadkeenna ku kordhin karnaa annagoo cunna cunto wanaagsan, dhaqdhaqaqaqa badina iyo gacmaha oo aan inta badan mayrna.